

ESKO - Casharrada min xannaanada ilii dugsigu

Xannaanooyinka iyo dugsiyadu waxa ay kaaliyaan ladnaanta dhallaanka, iyagoo siiya jawi u gogol-xaara korriinka, kobaca iyo waxbarashada, iyagoo ay la wadaagaan waalika dhallaanka. Xannaanada iyo waxbaridda aasaasiga ahi waxay ka koobmaan hab caqligal ah kaasoo dhanka kobaca ilmaha u ah arrin macne ahaan isku taxan u soconaya oo dhammaystiran. Waxbaridda hordhaca iyo midda bilowga ahi waxay xoogga saaraan oy wadaagaanna tabaha qorshaha barid iyo barbaarineed, sida fikiridda, tabo-bulsheedka iyo hawlaha lala wadaago waalidiinta.

ESKO waa laba qaybood. Macallinka xannaanadu wuxuu u diraa casharrada -ESKO macallinka iskoolka uu ilmuhu aadi doono. Ujeedka casharraadaas waa inay dhankooda u sahlaan ilmaha u gudbista iskool. Qaybta ugu horreysa ee ESKO (leylisyada xannaanada) waxaa la sameeyaa sannadka hore ee xannaanada bilaha april ilaa may, qeybta labaadna (leylisyada dugsigu) waxaa la sameeyaa bila ogosto ilaa septeber. Ilmuhu wuxuu ku billaabaa ka shaqaynta cashirrada deegaan uu garanayo, wuxuuna ku sii wataa ka shaqeyntooda dugusiga. Ilmuhu wuxuu kaga shaqeynayaa casharrada qaabka loogu diray, awooddiisa iyo xeeladdiisa, sidaasuuna ku dareemi karaa inuu guul gaaro. Haddaba waxaa muhiim ah, inuu ilmuhu isagu isku uga shaqeeyo casharrada, sidaasna loo daayo. lama saxo, dhibcana laga ma bixiyo. Qeyb cashirka ka mid ah waxaa loo sameyn karaa si wada jir ah, qeybna gooni-gooni.

Ilmuhu wuxuu tusayaa macallinkiisa soo socda, wixii uu kaga soo shaqeeyey xannaanada, marka qeybihii casharka iskoolka laga shaqeeyana, ilmuhu waxaa xasuus loo siinaya casharradii ESKO, ee uu ka shaqeeyay ee sannadkii koowaad iyo kii xannaanadaba. Waalidku waxey macallinka la buuxinayaan bogga hore ee casharrada- ESKO. Isla markaasna waalidku wuxuu arkayaa casharradii uu ilmuhu ka shaqeeyay, waxayna ilaa bilowga la socdaan howlwadaagga.

GUUL FARXADEED & SHAQO XIISO LEH!

ANIGA OO JOOGA XANNAANADA IYO DUGSIGA

Magaca: Gabar: / Wiil: Taariikhda dhalasho: Waalidka: Walaalaha:

**Afka hooyo: Afka guriga: Cinwaanka: Tel: Xannaanada:
Macallimiinta fasalka xannaanada: Arrimaha ilmuhu xiiseeyo:**

Magacan dugsiga:

Fasalka:

Taariikhda: _____ / _____

Saxiixa waalidka